# Adeegyada Multnomah iyo Qalabka Baaritaanka (MSST):

**Dib u habaynta Nidaamka Coordinated Access ee Degaanka Multnomah**

**Su'aalaha Inta badan La isweydiiyo ee ku saabsan Dib u habaynta Nidaamka Coordinated Access:**

1. **Maxaa isbeddelaya?**
    a. Ka hor dib u habaynta, Nidaamka Coordinated Access ee Degaanka Multnomah wuxuu isticmaalay VI-SPDAT (Qalabka Caawinta Go'aanka Mudnaan siinta Adeega Tilmaanta Nuglaanshaha) si loo go'aamiyo sida ilaha guryaha qaarkood uu mudnaanta u siiyo Nidaamka Coordinated Access. Dib u habaynta CA waxay VI-SPDAT ku beddelaysaa nidaamka helitaanka isku duba ridan oo cusub oo ay ku jiraan Adeegyada Multnomah iyo Qalabka Baaritaanka (MSST). Qalabkan cusubi wuxuu tixgelin siinayaa baahiyaha dadka iyo waxyaabaha la doorbidayo iyo ilaha nidaamka ee la heli karo. Marka lagu daro marida la marayo su'aalaha baaritaanka, dadka waxaa sidoo kale la siiyaa Xallinta Dhibaatada Guryaha. Waxaan sidoo kale dib u eegaynaa siyaasadahayaga iyo nidaamyadayada iyada oo lagu saleynayo jawaab celin aan ka helnay kooxahayaga tala-bixinta, iyo sidoo kale jawaab aan ka helnay bulshada sanadihii la soo dhaafay.
2. **Maxaan u marnay nidaamkani?**
    a. Xubnaha ka tirsan bulshada ee guri la'aanta ah iyo bixiyayaasha adeegyada guri la'aanta ayaa bixiyay jawaab celin sanadihii la soo dhaafay in qalabka qiimeynta ee VI-SPDAT uusan ahayn mid ka warqaba dhibaatooyinka naxdinta leh ama dhaqan ahaan jawaab u ah. Waxaan rabnay in aan abuurno qalab iyo nidaam cusub oo mudnaanta siiya guryaha oo ka fiican nidaamkii hore, oo u oggolaada nidaamka in uu noqdo mid dabacsan marka ilaha degaanka iyo qorshayaashu isbeddelaan. Dib u habaynta waxaa hagaya dad waayo-aragnimada nololeed u leh guri la'aanta iyo bixiyayaasha adeega guri la'aanta.

3. **Sidee buu nidaamkani cusub uga duwan yahay VI-SPDAT?**
    a. Qalabka cusub ee MSST wuu ka gaaban yahay oo wax badan ka warqaba dhibaatooyinka naxdinta leh, wuxuuna weydiinayaa su'aalo waafaqsan waxyaabaha degaan ahaan mudnaanta leh. Intaasi waxaa dheer, nidaamka cusubi wuxuu dhiirigelinayaa sinnaanta helitaanka la xiriirta ilaha guryaha la heli karo. Qalabka cusub iyo nidaamka qiimeynta waxaa loo dejiyay oo loo habeeyay bulshada maxalliga ah ee ku nool Degaanka Multnomah isaga oo ku saleysan talooyinka iyo jawaab celinta daneenayaasha muhiimka ah. Tani waxaa ka mid ah dadka waayo-aragnimada nololeed u leh guri la'aanta iyo bixiyayaasha adeega guri la'aanta, iyo cilmi-baaris lagu sameeyo kuwa leh caqabadaha ugu sarreeyaa ay ka haystaan guryaha, iyo xogta degaanka.
4. **Ma wax ilaha guryaha oo cusub ayaa lagu daray Nidaamka Coordinated Access?**
    a. Waqtigan la joogo, ma jiraan wax ilaha guryaha oo cusub oo lagu daray daray Nidaamka Coordinated Access.
5. **Sidee bay bulshadu uga qayb qaadatay nidaamkani?**
    a. Xafiiska Wadajirka ayaa sanadihii la soo dhaafay jawaab celin ka qaaday adeeg bixiyayaasha uga soo shaqeeyay Nidaamka Coordinated Access degaan ahaan. Xafiiska Wadajirka wuxuu sidoo kale hawl geliyay Guddiga Kormeerka, oo ka kooban bixiyayaasha adeegyada guri la'aanta ee Degaanka Multnomah, iyo Isku xirka Guryaha ee Wada shaqeynta leh, oo ah koox dhanka la talinta oo waayo-aragnimada nololeed u leh guri la'aanta.
6. **Yaa u qalma nidaamka qiimeynta ee cusub?**
    a. Shuruudaha u qalmidu wax yar ayuu u kala duwan yahay dadyowga kala duwan.
        i. Iyada oo loogu talagalay dadka waaweyn ee aysan la socon carruur yar yar oo ah (dhammaan xubnaha ka tirsan qoysku ay yihiin 18+), waa in ay yihiin kuwo ay la soo deristay guri la'aan dhab ah (ku jiraan hoy, ama meel aan loogu talagalin in dadku ku noolaadaan sida RV aanan lahayn biyo socda ama koronto, iwm.). AMA
        ii. Dad waaweyn oo khatar soo fool leh ugu sugan in ay lumiyaan deganaanshahooda aasaasiga ah ee habeenkii muddo 14 maalmood gudahood ah; marka aan degaan kaasi soo raaca la aqoonsan; oo qofkana ka maqan tahay ilo ama nidaam taageero si uu helo guryo kale oo joogta ah.

iii. Iyada oo loogu talagalay qoysasta haysta carruur yar yar, waa in ay la soo deristay guri la'aan dhab ah (ku jiraan hoy, ama meel aan loogu talagalin in dadku ku noolaadaan sida RV aanan lahayn biyo socda ama koronto, iwm.) ama yihiin "doubled-up" ama "couch-surfing"— oo ka dhigan in ay guri la degan yihiin qoysas iyo asxaab laakiin aysan ku jirin heshiiska ijaarka.

iv. Qof kasta ama qoys kasta oo cararaya, ama isku dayaya in uu cararo, rabshadaha qoyska; oo aan lahayn degaan kale; oo ay ka maqan tahay ilo ama nidaam taageero si uu helo guryo kale oo joogta ah.

7. **Qalabka cusub ma yahay mid saadaalinaya noocyada adeeg iyo guryo ee ay tahay inay dadku helaan?**
   a. Qalabka cusub looguma talagalin in uu saadaaliyo noocyada adeeg iyo guryo ee ay tahay inay dadku helaan Taasi beddelkeeda, qalabka cusub waxaa loogu talagalay in uu mudnaanta siiyo qoysaska leh caqabadaha ugu weyn ee dhanka guryaha ee adeegyada xaddidan leh. Mudnaantaasi waxay ku saleysan tahay waxyaabaha degaan ahaan mudnaanta leh oo bulshadeenu isku raacday, oo ay ku jiraan qoysaska sida weyn loo matalo ee ay ka midka yihiin dadka ay la soo deristay guri la'aantu iyo kuwa aan helin taageero ku filan 'underserved' ee adeegyada guri la'aanta. Iyada oo loogu talagalay qoysaska ka tirsan koox mudnaan la siinayo, Kala doorashada Guryaha & Weydiimaha Isbarbardhiga ayaa go'aamin doona ilaha guryaha la heli karo ee sida fiican u buuxin doona baahidooda.
8. **Maxaa ku dhici doona dadka isla haddaba lagu qiimeeyay VI-SPDAT?**
   a. Dadka qaarkood ee isla haddaba lagu qiimeeyay VI-SPDAT waxay sii ahaan doonaan kuwo mudnaanta la siinayo guryaha. Dadka dhibcahoodu ka hooseeyaan qiyaas gaar ah waxaa dib loogu qiimeyn doonaa qalabka cusub. Waxaan dejinaynaa heerka dhibcaha si ay u hagaan go'aanadaaasi.
9. **Miyay dadka helaya adeegyada, sida daaweynta soo kabashada ama dib u dejinta degdega ah, lumin doonaan dhibco oo aanan mudnaan la siinaynin?**
   a. Maya, hadafka laga leeyahay nidaamka cusub ee CA waa in la ogaado qoysaska ay haystaan caqabadaha ugu weyn ee dhanka guryaha. Dadku kuma waayi doonaan mudnaan la siinayo 'deprioritized' in ay isla haddaba ka qayb qaadanayaan adeegyada.
10. **Qof kastaa ma heli doonaa ilaha xallinta dhibaatada guryaha?**
    a. Hadafkayagu waa bixinta ilaha xallinta dhibaatada guryaha oo la siiyo dhammaan qoysaska, iyada oo la ogyahay in qof kasta mudnaan la

siin karo kaasi oo loogu talagalay kooxda mudnaan leh ee Nidaamka Coordinated Access. Anaga oo dhisayna dadaaladeena ku aadan ilaha xallinta dhibaatada, waxaan filaynaa in aan awoodno bixinta talo iyo qiimeynta ilaha, laakiin maaha taageero dhaqaale, oo la siinayo qof kasta oo baahan.

**11. Sidee bay dib u habayntani ula socotaa Qorshe Hawleedka Ka jawaabida Hoy La'aanta Degaanka (HRAP)?**

a. Xafiiska Wadajirka Adeegyada Guri la'aanta wuxuu xiriir dhow la leeyahay Xafiiska Guddoomiyaha Degaanka iyo kooxaha qorsheynta si loo xaqiijiyo in dib u habaynta Nidaamka Coordinated Access ku habboon yahay Qorshe Hawleedka Ka jawaabida Hoy La'aanta uuna gacan ka geysanayo sidii loo gaari lahaa hadafyada qorshaha.

**12. Haddii aan ahay guri la'aan, sidee baan u heli doonaa adeegyada?**

a. Qoysaska leh carruur ka yar 18 jir: Waxaad wacdaa 211.
b. Dadka waaweyn ee aysan la socon carruuri: Wac 844-765-9384. Waxaad sidoo kale buuxin kartaa baaritaanka hore adiga oo buuxinaya foomkan.
c. Dadka waaweyn ee aysan la socon carruur ee jeclaan lahaa qiimeyn dhaqan ahaan gaar ah oo loogu talagalay qoysaska Madow, Dadka dhulka loogu yimid ama Dadka kale ee Midabyada kala duwan leh (BIPOC): Khadka BIPOC CHAT ka wac 503-280-2600 x 654 ama email u dir housingreferrals@ulpdx.org.
d. Dadka soo halgamay: Khadka Adeegyada Dadka soo halgamay ka wac 855-425-5544.
e. Dadka ka Badbaaday Rabshadaha Qoyska: Call to Safety 503-235-5333 ama, Isbaanishka, Project UNICA 503-232-4448
f. Dhallinyarada Aan la wehelinin (Ka yar 25): La xiriir Janus Youth adiga oo sii maraya Access Center oo laga helo 635 SW Alder St. oo ku taala Portland ama adiga oo wacaya 503-432-3986

**13. Maxaa dhacaya ka dib marka qiimeyntu dhammaato?**

a. Dadka qaarkood ayaa lagu ogeysiin doonaa muddo 2-3 toddobaad gudahood ah haddii la geliyo kooxda mudnaanta la siinayo ee loogu talagalay guryaha. Qoysaska waxaa la siin doonaa ilaha xallinta dhibaatada guryaha xataa haddii aan la gelin kooxda mudnaanta la siinayo. Tani waxaa ka mid noqon kara taageero dhaqaale, laakiin taageerada noocaasi waa mid kooban.

14. **Waxaan leeyahay meel aan ku noolaado, laakiin ma bixin karo lacagta ijaarka waxaanan ka walwalsanahay in aan lumiyo gurigayga.  Maxaan sameeyaa?**
    a. Degaanku wuxuu bixiyaa ilo xaddidan oo loogu talagalay ka hortagga guri la'aanta, laakiin lacagahaasi ma sii maraan Xafiiska Wadajirka Adeegyada Guri la'aanta ama Nidaamka Coordinated Access. Wicitaanka 211 iyo in si toos ah loogu xirmo bixiyaha adeegyada guri la'aanta waa habka ugu wanaagsan ee lagu helo lacagahaasi.
15. **Haddii aan sii maro qiimeynta Nidaamka Coordinated Access xagaagani, ma la i qiimeyn doonaa iyada oo la adeegsanayo qalabka cusub, VI-SPDAT, ama labadoodaba?**
    a. Ilaa iyo inta aan ka bilaabayno nidaamka cusub bisha Oktoobar, qoysasku waxay sii wadi doonaan in lagu qiimeeyo VI-SPDAT. Xagaagani, Xafiiska Wadajirku wuxuu sameynayaa tijaabo yar halkaasi oo dadka qaarkiis la qiimeeyo iyada oo la adeegsanayo qalabka iyo nidaamka cusub.
16. **Waxaan rabaa in aan ka caawiyo saaxiib/deris/xubin ka tirsan qoys, iwm. in uu helo qiimeynta guryaha.  Sidee baan igu xidhaa iyaga?**
    a. Waxaad wici kartaa 211 wixii la xiriira qoysaska ama khadadka CHAT ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aysan la socon carruur.  Iyada oo aysan jirin bixinta macluumaadku, adeeg bixiyayaashayadu kulama soo socodsiin karaan natiijada wicitaankaaga, markaa dib uma maqli doontid haddii aan awoodno in aan caawino qoyska.